Allaha nafta Maxamed Gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee Qofka i maqla ee Ummaddaan ka mid ah Yahuudi ama Nasraani-kuu doonaba ha ahaadee-, ee dhinta isagoon rumayn xaqa la ila soo diray wuxuu ahaan doonaa kuwa naarta gelaya

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee-waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay - nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee- uu yiri: "Allaha nafta Maxamed Gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee Qofka i maqla ee Ummaddaan ka mid ah Yahuudi ama Nasraani-kuu doonaba ha ahaadee-, ee dhinta isagoon rumayn xaqa la ila soo diray wuxuu ahaan doonaa kuwa naarta gelaya".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ku dhaartay Qofka maqla Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee oo dacwada Islaamku gaadho, yahuudi iyo kiristaan ama qayrkoodba ha ahaadee, ee dhinta isagoon Islaamin, inuu ahaanayo mid naarta gala oo ku waaraya waligiiba.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3272